

The  
Electoral  
Commission

Aqoonsiga  
codbixiyaha -  
Hagahaaga

Wax kasta oo aad u baahan tahay  
inaad ka ogaato aqoonsiga sawirka  
leh ee doorashooyinka deegaanka  
ee Ingriiska ee Maajo 2023

# The Electoral Commission

## **Khamiista 4-ta Maajo 2023, doorashooyinka deegaanka ayaa ka dhacaya guud ahaan Ingiriiska.**

Doorashooyinkan, waxaad u baahan doontaa inaad keento Aqoonsi sawir leh si aad ugu codayn karto goobta codbixinta.

Buug-yarahan ayaa sharxi doona noocyada aqoonsiga sawirka ee aad isticmaali karto si aad u codayso. Waxa kale oo ay sharraxaysaa sida loo codsado dukumeentiga Aqoonsiga codbixiyaha ee bilaash ahaan, oo loo yaqaan Shahaadada Awooda Cod-bixiyaha, haddii aad mid u baahan tahay.

Sidee ayaan isu  
diiwaan galiya  
inaan codeeyo?



Si aad u codayso doorashooyinkan, waa inaad ku jirtaa diwaanka si aad u codayso **11:59pm ee Isniinta 17 April 2023**.

Haddi aanad waligaa is diwaan galinin, oo aad dhawaan u guurtay ciwaan kale, ama aad magacaga bedeshay, iska diwaangeli si aad uga codayso onlineka [gov.uk/register-to-vote](https://www.gov.uk/register-to-vote). Waxa kale oo aad codsan kartaa adiga oo buuxinaya foom codsi ah oo warqad ah.

Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo diiwaangelinta codbixinta, ama aad rabto inaad codsato foom codsi, la xidhiidh golaha deegaankaaga.

Si aad u hesho faahfaahinta xidhiidhka ee golaha degaankaaga booqo [electoralcommission.org.uk/voter](https://www.electoralcommission.org.uk/voter) ama wac khadkayaga caawinta **0800 328 0280**.

Waa kuwee  
doorashooyinka  
aan ka  
codeynayo?

Doorashooyinka deegaanka ayaa ka dhacaya 230 goobood oo England ah Khamiista **4ta Maajo 2023**, oo ay ku jiraan doorashooyinka golaha deegaanka, oo ay ku jiraan doorashooyinka duqa magaalada iyo baadariyaasha.



Si aad u ogaato haddii ay jiraan doorashooyin ka dhacaya agagaarkaaga gal [electoralcommission.org.uk/voterID](https://electoralcommission.org.uk/voterID)



Ama wax khadkayaga caawinta ee **0800 328 0280**.

# Aqoonsi nooc ee ayaan isticmaali karaa si aan u codeeyo?

Waxaad u baahan doontaa oo kaliya inaad tusiso hal nooc oo aqoonsi sawir leh, laakiin waxaa loo baahan yahay inay noqoto mida asalka ahaa ee ma aha wax nuqul ah.

Waxaad isticmaali kartaa mid ka mid ah nooca soo socda ee aqoonsiga sawirka si aad awood ugu yeelatid inaad ka codeeyso goobta codbixinta.

 <p><b>Safarada caalamiga</b> Baasaboor</p>	 <p><b>Safarada gudaha</b> Qaar ka mid ah kaararka safarada ee qiimadhimista/bilaashka</p>
 <p><b>Baabuur wadista iyo dhigashada</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Ruqsada baabuur wadista (oo ay ku jiraan kuwa kumeel gaarka ah)</li> <li>• kaarka buluuga</li> </ul>	 <p><b>Dokumentiyada kale ee ay dawladdu soo saartay</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Dukumeentiga socdaalka biometric</li> <li>• Kaarka Aqoonsiga Difaaca</li> <li>• Kaarka aqoonsiga qaranka</li> </ul>
 <p><b>Cadaynta da'da</b> Kaarka aqoonsiga oo leh calaamad PASS (Caddaynta Qorshaha Heerarka Da'da)</p>	

Haddii aad haysato nooc ka mid ah aqoonsiga sawirka ee la aqbalay kaas oo dhacay, wali waxaad ku isticmaali kartaa inaad ka codayso goobta codbixinta haddii ay wali adiga muuqaalkaga u eg yahay.

Haddii aadan horey u haysan nooc aqoonsi sawir ee la aqbalay, ama aadan hubin in aqoonsiga sawirku uu wali adiga kuu egyahay, waxaad codsan kartaa dukumeenti aqoonsi codbixiye oo bilaash ah, oo loo yaqaan Shahaadada Awooda Codbixiyaha.

Waxaad u baahan tahay inaad isdiiwaangeliso ka hor intaadan codsan Shahaadada Awooda Codbixiyaha. Markaad isdiiwaangelisid si aad u codayso, waxaa lagu waydiin doonaa inaad haysatid aqoonsi sawir ama inaad rabto inaad codsato Shahaadada Awooda Codbixiyaha.



Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan noocyada aqoonsiga ee la aqbali doono booqo [electoralcommission.org.uk/voterID](https://electoralcommission.org.uk/voterID)



Ama wax khadkayaga caawiinta **0800 328 0280**.

# Dalbashada Shahaadada Awoodsiinta Codbixinta



Wakhtiga kama dambaysta ah ee lagu codsanayo Shahaadada Awooda Codbixiyaha ee lagu tala galay isticmaalka doorashooyinkan waa **5 galabnimo Talaadada 25ka Abriil**, laakiin waa inaad sida ugu dhaqsaha badan u codsataa haddii ay dhacdo in golaha deegaankaagu u baahdo inay adiga kaala hubiyaan wixii faahfaahin ah.



Waxaad Shahaadada Awooda Codbixiyaha ka dalban kartaa onleenka **[voter-authority-certificate.service.gov.uk](https://voter-authority-certificate.service.gov.uk)**

Waxa kale oo aad codsan kartaa inaad buuxisid foom codsiga ee warqad ah iyo inaad u dirtid golaha deegaankaaga. Waxa kale oo laga yaabaa inaad shakhsi ahaan uga codsato xafiiska golaha deegaankaaga.

Haddii aad u baahan tahay wax caawimo ah oo ku saabsan codsashada Shahaadada Awooda Codbixiyaha ama aad rabto inaad codsato foom codsi, la xidhiidh golaha deegaankaaga. Si aad ku heshid faahfaahintooda booqo **[electoralcommission.org.uk/voter](https://electoralcommission.org.uk/voter)** ama wac khadka caawinta ee helpline on **0800 328 0280**.

# Macluumaad noocee ah ayaan u baahanahay inaan bixiyo markaan codsanayo Shahaadada Awooda Codbixiyayaasha?

Markaad codsanayso Shahaadada Awooda Codbixiyaha, waxaad u baahan doontaa inaad bixiso:

- **Magaca**
- **Taariikhda dhalashada**
- **Cinwaanka**
- **Lambarka Caymiska Qaranka**

Haddii aadan aqoon lambarkaaga Caymiska Qaranka, ama aadan haysan, sidoo kale waad codsan kartaa. Golahaaga ayaa kula soo xidhiidhi doona si ay kaa codsadaan caddayn kale ee aqoonsigaaga.

Waxaad sidoo kale u baahan doontaa inaad codsigaaga ku dartid sawir. Shuruudaha sawirku waxay la mid yihiin shuruudaha sawirka baasaboorka.



Wax badan oo ku saabsan shuruudaha ka ogow  
[electoralcommission.org.uk/voterID](https://electoralcommission.org.uk/voterID)



Ama wax khadkayaga  
caawiinta ee **0800 328 0280**.



# Maxaa dhici doona Saldhiga goobta codbixinta?

Markaad timaado goobta codbixinta, xubin ka mid ah shaqaalaha ayaa:

1. Ku weydiin doonaa magacaaga iyo cinwaankaaga si ay kaa helaan diiwaanka doorashada
2. Ku weydiin doonaan aqoonsiga sawirka, oo hubin doonaan haddii la aqbali karo
3. Haddii aqoonsigaaga la aqbali karo, waxay ku siin doonaan warqadda codbixinta waxayna ku tilmaami doonaan inaad ku buuxiso goobta codbixinta sida caadiga ah

Goob gaar ah ayaa ka jiri doonaa goobta cod bixinta, si aad u dooran karto in aqoonsiga sawirkaaga si gaar ah loo eego haddii aad rabto. Tani waxay noqon kartaa qol gaar ah, ama meel gooni ah ee daah ah, waxayna ku xidhan tahay goobta codbixinta.

Shaqaalaha goobta codbixinta waxay halkaas u joogaan inay caawinaad fidiyaan. Haddii aad u baahan tahay caawimaad wakhti kasta, iska weydii.

## Ku codaynta boosta ahaan

Uma baahnid inaad bixiso aqoonsi sawir si aad ugu codeeyso boosta ahaan.

Ma jiraan siyaabo kale ee lagu codeeyo?



Si aad u codsato codaynta boosta ahaan, waxaad u baahan doontaa inaad buuxiso foomka codbixinta boostada oo aad hubiso inaad soo celisid golaha deegaankaaga **5pm Talaadada 18ka Abriil 2023.**

Waxaad warqadaada codbixinta ku heli doontaa boostada . Buuxi oo soo celi warqadaada codbixinta, adiga oo hubinaya inaad siiso wakhti kugu filan oo ay ku timaado golaha deegaankaaga **10pm Khamiista 4ta Maajo.** Haddii aadan waqtigeeda boostada ku soo celin karin xirmadaada codbixinta, waxaad geyn kartaa goobta codbixinta ama xafiiska golaha deegaankaaga maalinta cod bixinta.

## Ku codaynta wakiil ahaan

(Si aad u fasaxdo qof aad ku kalsoon tahay inuu kuu codeeyo bedelkaa)



Si aad u codsato in wakiil ahaan u codeeyo, buuxi foomka codsiga oo u dir golaha deegaankaaga si uu ku yimaado **5pm Talaadada 25ka Abriil 2023.**

Qofka aad doorato inuu bedelkaaga kuu codeeyo wuxuu u baahan doonaa inuu tago goobta codbixintaada si uu uga codeeyo waxaana looga baahnaan doonaa inuu tusiyo aqoonsi sawir si ay uu kuu codeeyo. Uma baahnaan doonaan inay muujiyaan aqoonsigaaga marka ay bedelkaaga kuu codeynayaan.

Xaalada degdeg ah oo aanad shakhsi ahaan aadi karin goobta codbixinta, waxaad codsan kartaa wakiilasho degdeg ah ilaa **5pm Khamiista 4ta Maajo.**

Wixii macluumaad dheeraad ah ama si aad u hesho foomka codsiga boostada ama wakiil, booqo **[electoralcommission.org.uk/voter](http://electoralcommission.org.uk/voter)** ama wac khadka caawinta ee **0800 328 0280.**

Sideen ayaa  
si dheeraad  
ah ku ogaan  
karaa?

Haddii aad leedahay wax su'aalo ah ama aad jeclaan lahayd inaad xogtan ku hesho qaab la heli karo, waxaad tagtaa boga [electoralcommission.org.uk/voterID](https://electoralcommission.org.uk/voterID), wac khadkeena caawinta ee **0800 328 0280** ama iskaan saar koodka QR ee hoose.



Buug-yarahan waxaa soo saaray Guddiga Doorashada.

Guddiga Doorashada waa hay'adda madax-banaan ee kormeerta doorashooyinka isla markaana maamula dhaqaalaha siyaasadda ee UK. Waxaan ka shaqeyneynaa inaan kor u qaadno kalsoonida dadweynaha ee geeddi-socodka dimoqraadiyadda iyo xaqiijinta daacadnimadeeda.

Nagala soco



**@ElectoralCommUK**



**facebook.com/ElectoralCommissionUK**



**@ElectoralCommissionUK**

Miyaan isudiiwaan geliyay si  
aan u codeeyo?

Miyaan haystaa Aqoonsi  
sawir leh?

Miyaan haystaa Aqoonsi  
sawir leh oo aan u qaato  
goobta codibixinta?

Haddii maya tahay, miyaan  
dalbaday Aqoonsi codbixinta  
ee bilaashka ah?

Miyaan codeeyey?

Xilliga kama dambaysta ah  
ee diiwaangelinta codbixinta  
doorashada deegaanka ee 2023  
waa **11:59pm ee Isniinta 17 April.**

Waqtiga kama dambaysta ah ee lagu  
codsanayo Shahaadada Awooda  
Cod-bixiyayaasha doorashooyinka  
deegaanka ee 2023 waa **5  
galabnimo Talaadada 25ka Abriil.**

Booqo [electoralcommission.org.uk/voterID](https://electoralcommission.org.uk/voterID) ama wac **0800  
328 0280** wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan:

- Isdiiwaangelinta codbixinta
- Aqoonsi nooc ee ah ayaa la aqbali doonaa marka la codeynayo
- Sida loo codsado Aqoonsiga codbixiyaha bilaashka ah